



National Institute for Public Health  
and the Environment  
Ministry of Health, Welfare and Sport

# Tilmaamaha daryeelka *la sameeyo kadib marka la qaato talaalka BCG*

Sida loo daryeelo cunugaaga kadib marka uu qaato talaalka



## Talaalka looga hortago cudurka qaaxada

Cunugaaga waxaa la siiyay talaalka BCG ee kahortaga cudurka qaaxada. Waa muhiim in meesha cirbada lagu duray si fiican loo daryeelo kadib marka ilmuhu qaato talaalka. Xaashidaan waxay sharaxaysaa waxyaabaha aad filan karto kadib talaalka, waxyaabaha ay tahay inaad sameeyso iyo waxyaabaha ay tahay inaad isha ku hayso.


### 1 Cunugaaga waxaa cirbada looga durayaa qaybta kore ee gacantiisa

Cirbadaan ma sababi doonto xumad saaid ah (qandho).




### 2 Boog ayaa meesha kasoo bixi doonta kadib hal illaa 2 billood

Arrintaan mararka qaar waxay qaadan kartaa muddo intaas kashii dheer. Waxay yeelan kartaa (dhiig iyo/ama malax). Tani waa wax iska caadi ah.



### 3 Boogtu waxay baabi'i doontaa kadib lix illaa 12 billood


Waxay meesha ku reebi doontaa nabar yar.



## Sida loo daryeelo cunugaaga kadib marka uu qaato talaalka

### Boogtu waxay yeelan kartaa dhiig ama malax

Haddii arrintaan dhacdo, saar suufka la saaro meelaha dhaawac ah.




### Cunugaagu wuxuu u qubeysan karaa una mayran karaa sidii caadiga ahayd



### Boogta ha marin wax jilicsan, kareen, saliid hana saarin suuf

Ha tuujin boogta.



### Taageero iyo Xog dheeraad ah

Haddii ilmahagu ka soo baxo qanjidhada qoorta ama kilkilada waa muhiim inaad la xiriirto Adeegga Caafimaadka Dadweynaha ee Dawladda Hoose GGD. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa GGD Haddii aad wax walaac ah ka qabto nabarrada.

This information is available in English at:  
Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:

ብቋንቋ ትግርኛ ዝተተርጎመ መልክዕ ናይ'ዚ ኣብሬታ፡ ኣብ'ዚ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-

هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضوع:

این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترسی است:



[www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials](http://www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials)

Published by:

**National Institute for Public Health  
and the Environment, RIVM**

PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven

The Netherlands

[www.rivm.nl/en](http://www.rivm.nl/en)

September 2022

Committed to *health and sustainability*